

**Macluumaadka
waalidka
Buug yare**

English as a Second Language



Ingriis sida Luqadda Labaad [English as a Second Language]

Hadafka Barnaamijka ESL ka
waa in ardayda u sahasho barashada

5 maado oo ay ku jiraa: akhriska,
qorista, ku hadalka, dhegeysiga &

tanaadinta dhaqanka. Taa waxaa raacsan,

Barnaamijka ESL waxay bixiyaan

fursaddo loogu talagalay ardayda Luqaddooda

Ingiriiska ay Xadidan tahay si ay

uga guuleystaan maadooyinka la isku rabo oo ayna u qallan-jebiyaan


iskuulka iyagoo markaasi xubin ka noqonaya
bulshada Maraykanka

Waaxda Xafiiska ESL ka

Michael Sain, Agaasimaha ESL
4077 Karl Rd
Columbus, OH 43224
Office: (614) 365-8802

llámenos para más información
appelez-nous pour plus d'informations
nala soo xiriir wixii macluumaad dheeraad ah
थप जानकारीको लागि हामीलाई कल
نرجو منكم الاتصال بنا للحصول على مزيد من المعلومات

Adigoo ubadkaaga ka caawinnaya
bilawga luqadda Ingiriiska ilaa iyo
diyaargarowga kulliyadda iyo Shaqada



Iskuulaadka Degmada Columbus [Columbus City Schools]

1. Waxaan kuugu dhiirigelinaynaa inaad soo wacdo Xarunta Wayn ee la iska Qoro lambarka xarunta waa (614) 365-4011 si ballan laguugu sameeyo
si ubadkaaga looga qaado imtixaanka Ingiriiska ee [LAS Links English].

2. Marka Xarunta Diiuuangelinta aad timaado (430 Cleveland Ave, Columbus OH 43215) oo aad u soo socota qaadashada imtixaanka, fadlan ku wan horey u soo qaado:

 - Aqoonsi waalidka oo sawir ku dhegan
 - Warqadda dhalashada ee ardayga
 - Caddayn ah ah in ardayga aad korsanayso/aad mas'uul ka tahay (haddii ay ku quseysyo)
 - Wax caddaynaya cinwaanka aad degan tahay
 - Kaarka tallaalka (warqadda tallaalka)
 - Warqaddaha iskuulka uu ka soo bedeshay ama kaarka fasalka ugu dambeeyaa ee Iskuulka horey uu u soo dhigtay ah (haddii ay quseysyo)
 - Dukumentiyada waxbarashada gaarka ah

3. Haddii ubadkaaga uu u baahan yahaybaaritaanka xanuunka qaaxada, waa laga baari doonaa. Laba maalmood ka dib, waa in aad dib ugu soo noqotaa si natijoooyinka aad u ogaato.

4. Ka dib marka u badkaaga uu qaato imtixaanka Luqadda Ingiriiska ee Las Links, buun dooyinka ku hadalka, maqalka, akhriska iyo qorista ee af-Ingiriiska waa lagaagala hadli doonaa.

5. Heerarka kala duwan ee lagaaga caawin karo ayaa laguu sheegayaa, iyo iskuulka gaarka ah ee aad dooran karto ayaa laga wada-hadali doonaa iyadoo laguu soo bandhigi doonaa iyadoo iskuulkaada laguu soo bandhigayo ay ku salaysnaan doonta heerka luqadda Ingiriiska ee ubadkaaga iyo halka aad degan tiihin.

6. Wuxuu xaq u leedahay in aad ogolaato ama aad diido iskuulka ESL ka ee laguugula tali-yay. Saxiixaaga ayaa lagu waydiisan doonaa.

7. Haddii canugaaga uu bas u baahan yahay, iskuulka cusub ayaa ku siin doonaa halka iyo goorta baska ubadkaaga uu u iman doono iyo goorta la soo celin doono.

8. Ubadkaaga iskuulkiisa/eeda cusub waxay iyaguna ay heli doonaan nuqdi ah natijadooda heerka luqadda Ingiriiska si markaa ay u heli la'haayeen fasalka ay lagu qoray oo heerkooda ah.

9. Bisha Nofember ee sannad kasta, waxaa iskuulka lagu qabtaa Kulanka Maclimiint Waalidka oo habeen ama maalin midkooda la qabto. Imaatinka shirkas wuxuu kaa caawin doonaa inaad wax ka ogaato skulka cusub, macalimiinta iyo waxyaabaha ubadkaaga ku adag ee ay dhici karto in ay jiraan.

Barnaamijka ESL ka

Heerka Duesiyga Hoose ee (Fasallada K-5)

- Qabashada Luqadda - Macalinka ESL ardayda cusub oo luqadda Ingiriiska baranaya waxay isugu soo ururinnayaan oo ay ka wada shaqeeyaan dhegeysiga, hadalka, akhriska iyo qorista
- Dhexgalhore ee Wax Akhriska iyo Qorista – Waxaa jira kalkaaliyaal macalimiin ah oo laba luqaddood ku hadla oo macalimiinta qaar kala shaqeeya bixinta casharrada oo ardayda kaalmada u baahan ka caawiya wax aqriska
- Dhexgalhore Barashada Xisaabta – Macalimiinta, Kalkaaliyayaasha labada Luqad ku hadla ee ESL wax ka dhiga casharada Dhexgallada Barashada Xisaabta ee ay bixiyaan iyo qaar ka mid ah waxay kaalmo ay siiyan ardayda kaalmada u baahan ee dhanka maadada xisaabta
- Barnaamijka Ku-Riix - Waa kalkaaliye cashar bixinta oo laba luqaddood ku hadla oo wuxuu macalimiinta uu siiyaa kaalmo dheeraad oo loogu talagalay ardayda ESL ka dhigata ee fasallada waxbarashada caadiga ku jira

Heerka Dugsiga Dhexe (Fasalka 6-8)

- Bartaha Luqadda Ingiriiska waxaa ku jiraa fasal lagu barto luqadda Ingiriiska oo ay baraan macalintooda ESL ka dhigta
- Fasallada kale waxay ku qaataan ardayda kale ee caadiga
- Dugsiga Dhexe ee Mifflin MS wuxuu lee yahay Meel ESL lagu Baro
 - Maadooyinka Ingiriis, Xisaab, Sayniska & Aqoonta Bulshada waxaa bisha Macalimiinta ESL ka
 - Maadooyinka kale oo dhanna waxaa u dhagaya macalimiinta luqadda Ingiriiska u dhashay

Heerka Dugsiga Sare (Fasalka 9-12)

- Maadooyinka Ingiriis, Xisaab, Sayniska & Aqoonta Bulshada waxaa dhici karta inay u dhigaan Macalimiinta ESL ka*
 - Maadooyinka kale oo dhanna waxaa u dhagaya macalimiinta luqadda Ingiriiska u dhashay
 - Inta ardayga luqaddiisa Ingiriiska ay sii wanaagsanaanayso, waxaa loo sii gudbin doonaa fasallada wax ka dhiga macalimiinta luqadda Ingiriiska u dhashay

Dugsiga Columbus Global Academy (Fasalka 6-12)

- Waxaa dhici karta in ardayda dugsiyada dhexe iyo sare heerkooda uu hoose waxaa dhici karta inay u qalmaan in ay fasallo ka qaataan Dugsiga Columbus Global Academy
 - Waa inuu Iskuulaadka Degmada Columbus uu ku jiraa in ka yar 2 sano
 - Waa inuu ahaadaa Barte Luqadda Ingiriiska oo luqadda Ingiriiska ku cusub
 - Waxaa talo ku bixiyay Xarunta Qiimeyn ama iskuulkoodii hore ee ESL ka ayaa ansaxiyay
- Dhamman fasallada oo dhan waxaa casharka bixiya macalimiinta ESL ka

Xarunta Xirfadda ee Fort Hayes (Fasallada 10-12)

- Ardayda xarunta xirfaddaha shaqo way soo xaadiri karaan si ay u bartaan xirfaddo shaqo oo gaar ah, sida Kalkaaliso Caafimaad, Kalkaaliso, Faryamo, makaaniko Baabuur, iyo intaa in ka badan
 - Ardayda ESL ka ee dhigta ESL ka waxaa la siinayaa taageero ama kaalmo
 - Ardayga kasta oo yimaada xarunta xirfadda shaqo waxaa loo diyaarinayaa inuu shaqeeyo ama jaamacad dhigto

*Maadooyinka Ingiriis, Xisaab, Sayniska & Aqoonta Bulshada waxaa bisha Macalimiinta ESL ka

Adeeggaha laga bixiyo Xarunta Adeegyada ESL ka

Xarunta Wacista ee ESL ka

Haddii aad u baahan tahay in aad la soo xiriirto qof jooga Iskuulaadka Degmada Columbus [Columbus City Schools], laakiin tarjumaan aad u baahan tahay, fadlan Xarunta Wacista ee ESL ka kala soo xiriir (614)365-8802. Waxaa noo jooga tarjumaano ku hadla luqadda Isbaanishka, Nebaali, Soomaali iyo Arabic ayaa jooga maalmaha Isniinta ilaa iyo Jimaada saacaddooga 8:00 am ilaa 3:00 pm inta lagu jiro maalinta iskuulka socdo. Luqadda Sawaxiliga iyo luqadda Faransiisk ayaa laga heli karaa laga heli karaa ka dib marka aad soo codsato.

Barnaamijka Imtixaanka Qallan-jebinta ee Ohio (OGT), Barnaamijka U Diyaarinta Kulliyadda & Xirfadda Shaqo (614) 365-8802

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay ardayda ESL ka dhigta ee ka gudbay dhammaan koorsooyinkii la iska baahnaa doo dhan, laakin aan gudbin dhammaan qaybaha 5 oo dhan ee OGT. Ardayda waxaa looga baahan yahay in uu ku barmooso dhammaan shanta qeybo ee Imtixaanka Qallan-jebinta ee Ohio (OGT) si uu aaga qallin-jebiyo.

- Waxaa jira waxbaris ee imtixaanka OGT
- Kocinta Shaqada / xirfaddaha shaqo ee aasaasiga
- Xogta u diyaargarowga kulyadda

Barnaamijka Wax aqriska iyo qorista ee Waalidka (614) 365-8802

- si loo wanaajiyoo luqadda Ingiriiska ee waalidiinteeena
- si looga caawiyo in ay fahmaan hanaanka waxbarasho ee iskuulka ka jira iyo in ubadkooda ay guulaystaan
- si loo wanaajiyoo xirfaddaha shaqo ee waalidka
- si loogu dhiirrigeliyo qoysaskeena ESL ka in door ama kaalin firfircoona ay ka qaataan jaaliyaddooda iyo iskuullaadka

Machadka Xilliga Xagaaga ee ESL OGT (Waa in la iska qoraa dhismaha iskuulkan)

- ESL ka 10ka-12ka fasallada & ardayda aan ku barmoosin dhammaan 5 qaybo ee imtixaanka OGT
- 2 toddobaadyo oo la qaadanayo ku celcelinta imtixaanka OGT
- Imtixaanka OGT waxaa la qaataa inta lagu jiro toddobaadka seddexaad


Adeegyada Degmo Dugsiyeedka Kale

Waxbarashada Gaarka ah

Haddii canugaaga ay dhibaato joogto ah ka haysato dhanka iskuulka, iskuulka ayaa kula soo xiriiri doona si aad isla kulantaan si loo go'aamiyo haddii ubadkaaga uu u baahan yahay kaalmo dheeraad ah oo loo diyaarinnayo qorshe kaalmo dheeraad ah uu ku helayo. Haddii ubadkaaga la siiyo kaalmo dheeraad ah oo uu ka helo Waxbarashada Gaarka ah, macalinka ESL ka u dhiga macalinka Waxbarashada Gaarka ah u dhiga ayaa kala shaqayn doona si loo go'aamiyo kaalmada ardayga ku haboon ee luqadda Ingiriiska. Sidoo kale waalidiinta ayaa macalimiinta ka dalban karaa in ay la kulmaan ama ay shir la yeeshaan macalimiinta iyagoo markaas la soo xiriira ubadka iskuulka uu dhigto ama soo waca (614) 365-8802 haddii aad u baahan tahay turjumaan.

Hibada Aqoonta Rabaaniga ah (Gifted & Talented)

XilligaDayrta (fall) ardayda fasalada 2 aad iyo 6 aad waxey qaadan doonaan imtixaan loo yaqaan (Terra Nova/In View) kaas oo laqu ogaanayo ardayda waxbarashadooda sareeyso. Marka la ogaado natijjad imtixaanka waxaa kula soo xiriiri doonaa dugsiga ardayga dhigto waxeyna helayaan waxbarasho heer sare ah ay bixiso qeybtaw qaabilsan ardayda aqoontooda sareeyso.



Barnaamijka ESL ka ee Jira

Xili kasta oo jiilaal ah [winter], canugaaga wuxuu qaadan doonaa Imtixaanka ku Hadalka Luqadda Ingiriiska (OELPA) si loo go'aamiyo heerarkooda ku hadalka luqaddooda, dhegeysiga, akhriska iyo qorista luqadda Ingiriiska. Inta ubadkaaga luqaddiisa Ingiriiska ay si wanaagsanaanayso, heerkoodana wuu sii kardhi doonaa. Waxaa yaalla shan heerar ee luqadda Ingiriiska ah .

Heerka 1—Waxqabadka-hore

Ardyada waxay bilaabayaan in ay fahmaan qaar ka mid ah kalmaddaha iyo jumladahan gaaban ee maqlaan ama akhriyaan, waxaa dhici karta in ay ku soo celceliyaan kalmado iyo jumladdo qaar ee caam ah, oo koobiyeeyaan ama qoraan warqaddo iyo kalmado qaar.

Heerka 2—Bilawga

Ardyada waxay bilaabayaan in ay fahmaan tilmaamo qoraal ah oo tusaale ah, sheekoooyinka luqadda Ingiriiska ee heer hooseeya, waxay fahmayaan qoraalka tusaale ah, su'aallo iyo fariimo, waxay bilaabayaan in jumlado ay qoraan oo qoraalkoodana lagu arko qaldaadyo dhanka naxwiga ah, oo ay ku hadlaan jumladahan gaaban oo ay xifdiyen.

Heerka 3—Dhexdhedaadla

Ardyada way fahmaan fekradda guud iyo faahfaahinta lagu taageero qoraalka heer-fadalka ee faahfaahsan, waxay fahmaan wada-sheekaysiga xaaladdaha bulsho, waxay qori karaan oo ay tafatiri karaan howlaha iskuulka laga siiyo (iyadoo ay kaalmo ay ka helayaan macalinka). Ardyada dhexdhedaadka ah waa in la siiyan imtixaanno kalaaska heerka-fasal ee uu macalinka ka taageeraa.

Heerka 4—Horeeya / Fasallada Caadiga ku Tijaabin

Ardyada way fahmayaan luqadda waxbarashada looga baahan yahay ee maadooyinka iskuulka laga bixiyo, oo waxay awoodaan in ay fahmaan qoraalka ku qoran buuggaagta heer-fasal, oo wada-hadal dheer ah way ka wada qaybqaataan. Ardaydan waxaa loo jadwaleeyay fasallada caadiga iyagoon aysan u baahnayn kaalmo dheeraad ah ama kaalma kooban u baahan.

Heerka 5—Si Buuxda ugu Hadalka Luqadda Ingiriiska

Ardyada wax fahmi karaan, way ku hadli karaan, way qori karaan oo way akhrin karaan sida ay ugu hadlaan kuwa luqadda Ingiriiska u dhashay oo kale. Intaa in ka badan ma halayaan kaalmo dheeraad ah oo intaa in ka badan looma texgeliyo in ay yihiin arday ay Xadidan tahay Aqoonta Luqadda Ingiriiska (LEP).

- Waxqabadka hore iyo heerarka Bilawga, kaalmo laga helo macalimiinta ESL iyo wabarashada gaarka ee ma calimiinta ay ku taliyaan
- Mar haddii canuga uu gaaro heerka Dhexdhedaadka, macalinka iyo waalidka waa in ay ka wada hadlaan xaddi taageero ee ay weli u baahan yihiin
- Goorta canuga uu gaaro heerka 4, waa inuu xaadiraa fasallada oo ay la dhigtaan ardayda luqadda Ingiriiska dhaladka ku hadla, oo kaalmada waxaa la siiyaa taageero haddii ay u baahan yihiin

Talo-siin loogu talgalay in Ubadkaaga ay ka Caawsio Waxbarashada

- Ka qaybgalka howlaha iskuulka sida Oriyanteeshanka & Kulanka Waalidiinta/Macalimiinta. Ka warqab waxyaabaha ubadkaaga uu baranayo iyo sida ay u hor marayaan.
- Guriga dhexdiisa uga samee meel xasiloon ee uu ubadkaaga fariisan karo oo uu ku samayn karo shaqo guriga ay macalinkiisa/diisa soo siisay si u ugu samaystaan. In howsha skuulka ay dhammeeyaan waa in mudnaanta koowaad la siiyaa marka loo fiiriyo ciyaaraha kale ee ay doonayaan inay sameeyaan.
- Haddii canugaaga uu luqadda Ingiriiska uu baranyo, marka ay telfishinka ay fiirsanayaan u shid halka ay farta ku soo qormato si uu u akhriyo waxa laga sheekaynayo. Si markaa ardaygu uu u maqlo oo uuna u dhegeysto luqadda Ingiriiska.
- Maktabbadaha Degmo Waynta Columbus waxay bixiyaan "Kaalmo Shaqo-guri" ee ardayga la soo siiyo. Ubadkaaga wuxuu tagi karaa maktabbada marka iskuulka uu ka soo baxo ka dib oo si kaalmo uga helo wax akhriska iyo shaqada iskuulka laga soo siiyay.
- Ka Qaybqaado Barnaamijka Wax akhriska iyo Qorista Waalidka ka wac (614) 365-8802 haddii kaalmo aad uga baahan tahay barashada luqadda Ingiriiska. Tan waxay kaa caawin doontaa dhanka shaqada, oo waxay awood kuu siin doontaa si gacan aad uga geysato howlaha shaqo ee ubadkaaga iskuulka laga siiyo.
- Haddii canugaaga ay dhibaato joogto ah ka haysato dhanka iskuulka, fadlan la xiriir iskuulka, ama macalinta, ama waaxda ESL ka. Xusuusnaw, haddii aad u baahan tahay qof tarjumaan ah oo adiga kuu tarjuma, waxaad soo wici kartaa (614) 365-8802 .

Iskuulaadka ESL [ESL Schools]

Elementary Schools

Avalon
Broadleigh
Burroughs
Cassady
Columbus Spanish Immersion
Cranbrook
Devonshire
Eakin
East Columbus
East Linden
Easthaven
Ecole Kenwood
Forest Park
Gables
Georgian Heights
Highland
Hubbard Mastery
Innis
Linden Stem
North Linden
Northgate
Northtowne
Oakmont
Salem
Scottwood
Siebert
Sullivant
Valley Forge
West Broad
Woodcrest

Middle Schools

Columbus Global Academy
Hilltonia
Johnson Park
Medina
*Mifflin Middle
Ridgeview
Wedgewood
Woodward Park

High Schools

*Beechcroft
*Columbus Global Academy
*Columbus North International
*Independence
*Mifflin High
*Northland
*West
*Whetstone

Briggs (only has one ESL Teacher)
Walnut Ridge (only has one ESL Teacher)

*ESL Sheltered Sites

ESL Service Center

Michael Sain, ESL Director
4077 Karl Rd.
Columbus, OH 43224
Program Office: 614-365-8802